



Hayada Minneapolis Public Housing Authority (MPHA) oo Qabatay Shirweyne sii fiican u dhacay

December 2015

Hayada MPHA ayaa waxeey soo qaban qaabisey shirweyne (VISIONING Workshop) khamistii, bisha November 12 oo ka dhacay Luxton Park. Shirweynahaan oo ahaa mid lagu soo casuumay degenayaasha guryaha Glendale Family Townhomes iyo dadweynaha degan xaafadaha deriska ah si looga la tashado mustaqbalka guryaha Glendale Townhomes. Jadwalka shirweynaha ayaa waxaa kamid ahaa soo dhaweyn guud oo uu sameyay Council Member Cam Gordon, oo laga soo doorta degmada labaad (Second Ward) oo Glendale Townhomes eey katirsantahay. Waxaa kale oo soo dhaweeyay dadweyne kabadan afartan (40) qof gabadha hogaamisa hayada MPHA oo layirahdo Cora McCorvey, Executive Director/CEO. Ms. McCorvey ayaa wayeey soo bandhigtay cajalad (video) oo sharaxeysa guryaha dadka daa'da ah ama dadka danyarta looga dhisay muda aan saa u fogeeyn magaalada Minneapolis. Cajalada (video) waxaa laga daawani karaa, halkaan riix:

<http://www.mphaonline.org>



Shirweynahaan guud waxaa soo qabaan qabiyey hayada Biko Associates, oo kacaawisa hayada MPHA xiriirka iyo turjubaada todoba luuqadood kamidyihin (Hmong, Oromo, and Somali). Si dadkii kasoo qeyb galay oo dhan loo gaarsiyo akhbaaradka iyo loo dhageysto una soo gudbiyan fikradahooda ama suaalahooda waxaa loo kala qeybiyey miisas turjubaan jooga luuqad walba oo miis walba looga hadlo. Tan waxeey suurta gelisay in kasoo qeeb galayaasha oo dhan ugu qeyb galaan wada hadhalka kusaabsan xaafada Glendale Family

Townhomes. Ka qeyb galayaasha waxey ka jawaabeen suala qoraal ah oo loogu kuur galaayo habka ugu haboon ee dib u habeen loogu sameyn karo guryaha xaafada Glendale Townhomes.

Jawaabihi suaalaha lasoo bandhigay oo kooban.

1. In kasta oo koox yar oo degenayasha ka mid ah eysan dooneyn in wax isbadel ah lagu sameeyo guryaha, in badan oo ka mid ah degenayaasha guryaha waxey soo bandhigeen cabasho ah in guryaha qololkooda yaryihiin gar ahaan musqulaha iyo qololka jifka; in eey maqlaan codadka deriskooda; dhaxan qaboow kasoo gasho dariishadaha; iyo in jaraanjarta iyo qeebta hoose eysan tagi karin dadka curyaanka ah ee wata gaariga curyaanka (wheelchairs). Degenayaasha cabashada soo gudbiyey waxeey latahay in dib u habeyn baxaadweyn oo kalii ah lagu sixi karo dhibka guryaha qabaan.
2. Dhamaan kasoo qeyb galayaasha ayaa soo gudbiyey in aan labadalin habka guryaha hada udhisanyihiin oo fududeyneysa in eey arkaan bananka caruurta kuciyaarayaan. Waxaa kale dhamaan isku afgarteen in qeebta beerta bananka ah aan labadalin, sababta oo ah waxeey isku soo dhaweyneysaa dadka, hormarineysaa deris wanaaga iyo is aaminaada degenayaasha xaafada.
3. Inta badan Degenayaasha waxey ka hadleen arimaha mustaqbalka eey rajeynayaan ineey gaaran oo kamid tahay ineey waxbarasho helaan si eey iskuugu filnaadaan, kadibdna uga guuran guryaha Glendale una raadsadan guryaha shaqsiga leeyahay oo lakireysta magaalada. Waxeey door bidayaan ineey meel u dhow jaamacada Minnesota degenaadaan. Waxaa kale eey codsadeen in laga hergeliyo xaafada Glendale mashruuc lagu caawinaayo carurtoda wax barashadooda, si mustaqbalka caruurta heersare u noqdo ugana maarmaan guryaha dadka danyarta ah (public housing).
4. Waa lagu kala fikrado duwanaa nuuca guryaha lasoo bandhigay in laga dhisaayo xaafada Glendale. Halkii meel nus degenayaashii kasoo qeyb galay shirka eey ka heleen nuuca guryaha lasoo bandigay, nus na kameysan helin. Qeybtii ka heshay waxeey tilmaamen in eey kaheleen balkoonka lafaristo, banaanka guriga hortiisa, dismaha noocisa iyo albaab khaas u ah guri walba. Dhanka kale qeybtii degenayaasha aan ka helin waxey soo jeediyeen in dad fara badan meesha lasoo dejinaayo oo kabadan 184 qoys oo hada

degan, in beerta guryaha hada kutaalo mesha laga saarayo, xiriirka degenayasha hoos u dhacaayo iyo guud ahaan qiimaha xafaada kutaalo Glendale townhomes ee prospect Park hoos u dhacaayo.

5. Qeyb yar oo kalii oo degenayaasha kamid ah ayaa shegay iney filaayaan in mustaqbalka fog ey sii degnaan doonaan guryaha Glendale Family Townhomes. Sida inta badan eey soo jediyeen in eey filaayan in noolashooda isbadaleyso mustaqbalka oo eey helaan fursad eey uga guuran dartood guryaha dadka danyarta (public housing).
6. Waxaa si weyn leyskuuga wada afgartay in dadweynaha guud ee dega xaafada Prospect Park eey aad uga faaidayaan in qeyb guryo oo dadka waayelka kalii lagu daro dismaha kasoo socda xafaada Glendale. Waxey u suurto gelini doontaa dadka hada ilmaha leh markey doonan in guri dadka wayeelka eey ka heli karaan xaafadoodan Prospect Park.

Qayaas ilaa 20 ka mid ah degenayaasha xaafada Glendale Family Townhome iyo kuwo kayimaadey xaafada Prospect Park ayaa waxeey goansadeen in eey san ka qeyb gelin shirweynihi guud. Waxaa lagu booriyey oo lagu soo dhaweeyey in eey ka qeyb qaataan shirka loga tashanaayo mustaqbalka xaafada eey deganyihiin ee Glendale Family Townhomes. Goan iyagu kooda ah ayey qaateen, waxeyna diideen casuumaadi hayada guryaha ee MPHA. Waxeey soo gudbiyeen qoraal cabasho oo eey kuqoran yihiin wax yaalaha eey rabaan in hayada guryaha ee MPHA eey texgeliso markii la goaminaayo mustaqbalka guryaha Glendale. Qoraalkii eey soo gudbiyeen waa la helay waana lagu daraayaa waxyaalaha lasoo bandhigaayo markii laga tashanaayo mustaqbalka guryaha Glendale iyo dib u dhiska ka soo socda.

Hayada guryaha ee MPHA ma qaban doonta shirkii joogtada oo lala yeelan jiray bil walba degenayaasha bishaan December 2015. Taa badalkeeda waxaa wakhti la gelini doonaa in la akhriyo waxyaalihi lasoo gudbiyey shirweynihi hada dhacay, iyo waxyaalihi qoraalka ee degenayaasha kusoo qoreen warqadihi looga keeney guryahooda, ama la suray albaabkooda maalintii Sabdiga (Saturday, November 7, 2015). Haddii warqadii lagu dhaafey aadan wali buuxin, fadlan soo buuxi waxaana aad keeni kartaa xafiiska guryahiina Glendale. Shirka dambe wuxuu dhici doonaa bilaha ugu horeeya sanadka soo socda ee 2016, waxaana lagu soo bandhigi doonaa goamo muhiim ah ee kusaabsan mustaqbalka waxa laga sameyn doona guryaha Glendale Family Townhomes, fursad lagu akhriyo oo wixii talo ah lagu soo jeedin karo ayaa leyn siin doonaa.

Hayada guryaha ee MPHA waxey u mahad celineysaa kasoo qeyb galayaashi shirweynihi (VISIONING Workshop), iyo sidii eey usoo hureen wakhtigooda, iyo juhdiga eey galsheen sidii eey ugu qeyb qaadan lahaayeen talada xaafadooda sidii eey u ahaan laheyd meel nabadgelyo, nadaafad wacan leh oo eey sii degenaadaan dadka danyarta ah ee xaafada Glendale Family Townhomes.



English

This information is important. If you do not understand it, please contact your property manager for free language assistance.

Hmong

Yog koj tsi to taub txog cov nqi lust seem ceeb, no, thov hu mus rau ntawm tsev luam qhov chaw ua hauj lwm Manager peb yuav pab ntxhais rau nej.

Somali

Halkan waxaa ku qoran war ama akhbaar aad u muhim ah, haddii aad fahmi kari weydo, fadlan ula tag wakiilka hay'adda Manager, si aad tarjumaad bilaash ah uga hesho.

Oromo

Beeksinfi kun hedduu barbaachisaa dha. Yaadni isaa hoo isiniif hin galle ta'e, bakka bu'aa Manager, akka afaan isiniif hikamu gargaarsa tolaa gaafadhaa.

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY - EQUAL EMPLOYMENT OPPORTUNITY